



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Noofambar 1, 2021

Ku socota: Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hawl wadaagayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS)

Ujeedada: Ra'yi ururinta shaqaalaha oo soo afjarmaysa

Hadda waxaanu soo dhaafnay waqtigii loo qabtay shuruudaha tallaalka ee Oktoobar 18, 2021 ee loogu talagalay Guryaha Koox ahaanta Loo degan yahay iyo Daryeelka Guriga Dadka Waayeelka ah. ODDS waxay soo afjaraysaa shuruudihii looga baahnaa daryeel bixiyayaasha in ay ku buuxiyaan ra'yi ururinta shaqaalaha ee Noofambar 5, 2021. Ra'yi ururintani waa laga xiri doonaa soo gudbinta dheeraadka ah dib taariikhdani.

[Farriinta wax gudbinaysa ee AR 21-088](#) ayaa wax laga beddelay si ay uga turjunto isbeddelkani. ODDS waxay sii wadaa in ay caawiso daryeel bixiyayaasha tilmaamay in aysan xasilloonayn/xaaladoodu deganayn iyada oo sababtu tahay tallaalka la isku waajibayay iyada oo la adeegsanayo qandaraasyada 30-ka maalmood ah, ee la haysto kala doorashada ah in lagu daro waqti dheeraad ilaa laga gaarayo Diisambar 31, 2021.

Iyada oo hore loo sii soconayo, haddii daryeel bixiyayaasha ay haysato shaqaale yaraan oo uu sabab u yahay dillaaca cudurka COVID-19, fadlan isticmaal [foomka Codsiga Taageerada Shaqaalaha ee ODDS](#) oo sii wad in aad la socoto [habka waxyaabaha dhici kara ee ODDS](#) ee loogu talagalay soo sheegida wixii kiisaska COVID-19 ah ee ka dhex jira shaqaalaha iyo dadka ka tirsan adeegyada.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa*  
[http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-  
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo [www.oregonrelay.com](http://www.oregonrelay.com) ama [www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers](http://www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers).